

## **Magacaabidda Maamulka Dhulka Soomaaliya**

### **MADAXWEYNHA JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qod. 8 Febbraayo 1950 lamba.12;

Markuu arkay qod. 87 ee Dastuurka;

Markuu Garowsaday baahida loo qabo in la siiyo maamulka ku meelgaarka ee Dalka Soomaaliya si waafaqsan Talooyinka ay meelmariyeen Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 21 Nofember 1949 iyo Heshiiska lagu gaaray Ginevra oo ay wehliyaan Talooyinka Golaha Wasaayadda ee 27 Jannaayo 1950.

Marka uu dhageystay talada Golaha Wasiirada; Iyo talo soo jeedinta Wasiirka Koobaad, Ku-simaha Wasiirka Arrimaha Afrika, oo uu soo bandhigay Wasiirka Arrimaha Dibadda.

### **WUXUU DEKEREETO KU SAARAYAA:**

#### **QODOBKA KELIYA**

Wasiirka Awoodda Buuxda la siiyay Dr. Giovanni Fornari waxaa loo xilsaaray Maamulka Dhulka Soomaaliya ee ku hoos jira maamulka Wasaayadda Talyaaniga, oo haysta awoodda iyo xilalka ku cad Heshiiska la soo sheegay.

Xeerkaan waxa loo dirayaa Hantidhowrka Guud si loo diiwaangaliyo.

Taariikha, Roma 31 Maarso 1950.

Saxixa Einudi

**Saxiixa De Gasberi**

**Saxiixa Sforso**

#### **HANTIDHOWRAHA GUUD**

#### **U QABILSAN HAWLAHA WASAARADDA A. I**

Marku arkay: 321

Roma, 5 Abril 1950

Agaasimaha Madaxa Xisaabaadka  
lamba. 265

**Saxiixa De Paolis**

Laga diiwaangeliyay Hantidhowrka Guud

Taariikhda 5 Abril 1950

Afrika Talyaaniga Diw. lamba. 12 Bogga

**Saxiisa Criscuola**